



PATIENT EDUCATION

Tilmaamaha Jadwalka ee GI

Goobta Qaliinka

□ **CentraCare Health Plaza -**

Su'aalaha ka Horeeya Qallinka 320-229-4974

Cinwaanka: 1900 CentraCare Circle, St. Cloud, MN 56303

Dhigashada Gaadiidka: Gaadiidka waxaa la dhigan karaa goobta gaadiidka la dhigto ee Woodlands. Qeybta dheefshiidka waxa ay ku taalaa (Digestive Center) dabaqa 2aad.

Diiwaangelinta: Iska diiwaangeli irida Woodlands.

□ **Isbitaalka St. Cloud -**

Su'aalaha ka Horeeya Qallinka 320-229-4974

Cinwaanka: 1406 6th, St. Cloud, MN 56303

Dhigashada Gaadiidka: Waxa aad gaariga dhigan kartaa dhismaha gaadiidka la dhigto ee Koonfurta.

Is diiwaan gelinta: Ka soo gal Dhismaha Koonfurta ee gaadiidka la dhigto oo wiishka ku yaal

Dhismaha Koonfurta Wiishka Dhismaha Koonfurta u raac dabaqa 2aad oo iska diiwaan geli Xarunta Baaritaanka Wadnaha (Heart & Vascular Center).

□ **CentraCare Melrose – 320-256-4231**

Cinwaanka: 525 Main Street West, Melrose, MN 56352

Dhigashada Gaadiidka: Goobta gaadiidka la dhigto ee laga soo galo gargaarka degdegga ah.

Is diiwaan gelinta: Fadlan imoow miiska hore ee Xarunta (Digestive Center) si aad isu diiwaan geliso baaritaanka.

Su'aalaha Baaritaanka: 320-256-1821

□ **CentraCare Sauk Centre – 320-352-2221**

Cinwaanka: 425 Elm Street North, Sauk Centre, MN 56378

Dhigashada Gaadiidka: Gaadiidka waxaa la dhigan karaa goobta gaadiidka la dhigto ee laga soo galo isbitaalka.

Is diiwaan gelinta: Fadlan imoow miiska hore ee Xarunta (Digestive Center) si aad isu diiwaan geliso baaritaanka.

Su'aalaha Baaritaanka: 320-352-2221

Is diiwaan gelinta:

- Waxaa telefoon kuu soo diraya xafiiska diiwaan gelinta, si ay u dhameystiraan is diiwaan gelinta oo ay taas u dajajiso baaritaanka marka aad isbitaalka timaado.

Jadwalka

- Haddii aad ooneyso **in ka noqoto balanta, fadlan naga soo wac 320-229-4933 oo dooro qabsashada balanta**. Xafiiska balamada waxa uu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa telefoonka lacag la'aanta ah ee 1-800-835-6652.
- Haddii aadan ku imaan karin balanta, waxaanu kaa codsaneynaa in aan na soo wargeliso 48 saac ka hor.

Telefoonka balanta dhakhtarka ka horeeya

- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku soo wacaya 5-7 cisho ka hor balanta baaritaanka. Waxa ay su'aalo kaa weydiinayaan waxyaabaha kaa caawin kara u diyaargarowga baaritaanka, kaala hadlaya caafimaadkaaga, oo kaa caawinaya in aad fahamto daawooyinka aad qaadan kartoiyo kuwa aadan qaadan karin ka hor iyo ka dib baaritaanka.
- Haddii aad WAX su'aal ka qabto tilmaamaha baaritaanka procedure, fadlan soo wax telefoon lambarada ku qoran goobta baaritaanka, Isniinta ilaa Jimcaha 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo,

Baaritaanka ka hor

- La xiriir ceymiskaaga si aad u hubiso in ay bixinayaan kharashka baaritaanka. Kala xiriir lambarka telefoonka ee dhinaca dambe ee kaarka ceymiska.

Macluumaadka wadaha gaariga

- Waa inuu kula socdaa wade gaari oo da'diisu tahay 18 ama ka weyn marka aad dhakhtarka timaado. Haddii aadan heysan wade gaari, waxaa suuro galin balanta dib loo dhigo.
- **Laguuma ogola** in aad gaarigaaga ku tagto gurigaaga. Laguuma ogola in aad gaari wado, tagsi ama bas aad raacdo, ama ka tagto kaligaa Qeybta Baaritaanka.
- Taksi waad u qaadan kartaa guriga iyada oo **qof weyn oo mas'uul ah** kula socdo.
- Haddii aadan heli karin **qof gaariga kugu wada oo mas'uul ah** (qof qoyska ka tirsan ama saxiib) oo guriga ku geeya, baaritaanka waxaa la sameynayaa iyada oo aan lagu suuxin ama balanta dib loo dhigo.
- Waxaanu si adag kugula talineynaa in qof kula joogo 24ka saac ee ku xiga baaritaanka waayo daawada suuxinta ayaa jirkaaga saameyn ku yeelan karta, xusuustaada, iyo sida aad u gaari karto go'aan wanaagsan, oo amaan ah.
- Laguuma ogola in aad shaqada ku noqoto, gaari waddo, ama makiinado ku shqeyso maalinta xigta baaritaanka. Ha cabin khamri hana saxiixin wax qoraal ah oo sharci ah 24ka saac ee xiga suuxdinta.
- Ka hor inta aadan ka tagin goobta baaritaanka, calaamadaha aasaaiga ah ee jirka waa ay ku dhow yihiin kuwo caadi ah.

Fariin/Tilmaamo gaar ah: